



Laparoscopy ISBITAALKA ROYAL WOMEN'S HOSPITAL

Waa maxay Laparoscopy?

Laparoscopy waa si kale oo loo sheego qaliinka yar ee lagu eegayo Ilmagaleenka.

Laparoscopy waa hab sahamin ah kaas oo lagu sameeyo suuxinta guud ka dib una ogolaanaya qofka cudurada dumarka yaqaan inuu fiiriyo xubnaha miskaha ku jira – ilmagaleenka, halka ilmuhu ku abuurmo iyo tuubooyinka ama ugxaan qadayaasha.

Maxaa loogu baahan yahay Laparoscopy?

Waxaa laga yaabaa in Laparoscopy la sameeyo si la hello sababta ama astaamaha aan lagu ogaan karin su'aallaha iyo baaritaanada caadiga ah.

Waxaa laga yaabaa in la soo jeediyo hadduu jiro...

- Xanuunka ka jira inta u dhexaysa labada miskood
- Dhalid la'aanta
- Shakiga buro ku taalla ogxaan sidayaasha (ovarian cysts)
- Shakiga uurka ku samaysma ilma galeenka banaankiisa (ectopic pregnancy)
- Caddad ku samaysmay miskaha oo la mid ah kuwa ilmagaleenka ku samaysma

Laparoscopy-ga waxaa laga yaabaa in la adeegsado si loo sameeyo hawlaha ay ka midka yihiin:

- Xirmada tuubooyinka si looga hortago ilmaha (tubal sterilization)
- Ka soo saarida ilmagaleenka
- Daaweynta xakamayn la'aanta kaadida ama debcida kaadi haysta iwm.

Diyaargarawga intaan wax la qaban

Waxyaallaha loo baahan yahay in la sameeyo inta aan wax lagu samayn waxa weeye soomitaan iyo in aadan sigaar cabin. Hawlaha la qabanayo qaarkood waxaa lagaaga baahan yahay inaad daawo qaadato si aad u banayso malawadka. Waa lagoo sheegi doonaa haddii tani muhiim tahay.

Waxa la samaynayo

Laparoscopy-ga waxaa lagu sameeyaa suuxin guud. Hawshaani waxay la xiriirtaa goyn wax laga goynayo halka xudunta ka hoosaysa. Irbad ayaa la gelinayaa meesha wax laga gooyey calooshana waxaa lagu buufinayaa gaaska kaarboondhaayoksaydhka. Tan ayaa u sahlaysa in qofka aqoonta u leh cudurada dumarku uu arko xubnaha ku dhexyaalla miskaha. Teleskoob lagu xiriiriyey fiidiyow ayaa la geliyaa. Qalab kale ayaa laga yaabaa in laga geliyo daloolka yar kaas oo laga sameeyey shuunka dushiisa. Dhamaadka hawsha dhamaan qalabka oo dhan waa laga bixinayaa, gaaskana waa la siideynayaa, maqaarkana halka uu ka furan yahay waxaa lagu daboolayaa tayb ama waa la qodbayaa ama biin ayaa lagu qabanayaa.

A Royal Women's Hospital Well Women's Publication



Dhibaatooyinka dhaca

Ma jiro qaliin aan khatartiisa lahayn, laakiin khataraha la xiriira qaliinkaan aad ayey u yar yahay. Khatartu waxay ku badnaan kartaa dumarka sigaarka caba, miisaankooduna aad u weyn yahay ama qaba dhibaatooyin kale oo caafimaad.

Dhibaatooyinka dhici kara qaarkood:

- Dhiigbax
- Dhaawac gaara malawadka, kaadi haysta, xididada dhiiga ama xubnaha kale.
- Infakshan ku dhaca ilmagaaleenka ama meelaha wax laga geliyey qofka.

Maxaa dhacaya markaas ka dib?

Qaliinka ka dib waxaa laga yaabaa inaad dareento

- Yaqaqsi ilaa heer ah.
- Xannuun yar iyo daal waa caadi ilaa 5 maalmood.
- Xannuun meesha wax laga gooyey.
- Muruq xannuun.
- Xannuun garabka halka ugu saraysa iyo feeraha ah. Waxaana keena tan wax yar oo gaasa oo ku harsan feeraha gudahooda. Waxaa kale oo dhici kara xannun caadada oo kale ah iyo dhowr maalmood oo dhiig riximka ka yimaado ama dheecan kale ka soo baxo.

Kiniiniga xannuunka ayaa laga yaabaa in loo baahdo.

Marka astaamuhu iska tagaan aadna fiicnaato waxaa laga yaabaa inaad bilaabi karto xarakaadyada gacanta laga qabto iyo isu galmoodka. Haddii astaamuhu aanay tegin, waa inaad la tashataa dhakhtarkaaga.

Natiijooyinka laparoscopy-ga waa lagaala hadli doonaa inta aadan isbitaalka ka bixin haddii ay lagama maarmaan tahay inaad daawo qaadatana maalin kale ayaa lagu samayn doonaa. Ballan ayaa lagaaga samayn doonaa Rugta Caafimaadka Dumarka Bukaansocodka ah marka ugu horraysa ee ay adiga suurta gal kuu tahay.

Haddii lagugu xiray qodbo ama biinan waa in uu kaa saaraa dhakhtarkaagu saddex maalmood qaliinka ka dib.

Haddii aad u baahan tahay in si dhaqso ah lagu arko waa inaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga ama Qaybta Xaalladaha Degdega ah ee Royal Women's Hospital **tel: 9344 2301**.